

Maamulka Naafonimada
Koritaanka

Hagaha Xaq-u-yeelashada iyo Adeegyada



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Tusmada Buugga

Qeexidda gobolka Washington ee naafonimada koritaanka.....	1
Xaq-u-yeelasho	2 - 5
Doorashada Koowaad ee Bulshada	6
Ka-tanaasulidda DDA.....	9
Guudmarka adeegyada ka-tanaasulidda	13



Waa maxay qeexidda gobolka Washington ee naafonimada koritaanka?

Naafonimadu waa in ay:

- Bilaabato ka hor inta qofku uusan noqon sideed iyo toban sano jir
- Socoto ama la filayo in ay sii socoto waqti aan la cayimin, iyo
- In ay ka kooban tahay xaddidaad baaxad leh oo qofka ku yimaada.

Naafonimada koritaanka waa

Naafonimo loo aanayn karo:

- Naafonimo xagga caqliga ah,
- Maskax-suux,
- Qalal,
- Dhakaako (Autism), ama
- Cudur kaloo la xiriira neerfaha ama xaalad kale oo si dhow ula xiriirto naafonimada caqliga ama u baahan taageero la mid ah tan shakhsiyaadka leh naafonimada caqliga.

Kuwani waa shuruudaha u-qalmidda gobolka Washington ee loogu talagalay xaq-yeelashada DDA.

Hannaanka go'aaminta xaq-u-yeelashada ee aasaasiga ah

1. Codsadaha ama wakiilka sharciga ah ayaa soo gudbinaya dokumentiyada loo baahan yahay iyo caddeynta go'aaminta

Waxyaabaha Ku Jira Codsiga:

- Codsiga Go'aaminta Xaq-u-yeelashada ee DDA (14-151)
- Oggolaanshaha (14-012)
- Ogeysiiska Hab-dhaqannada Astursnaanta ee loogu talagalay Macluumaadka Sirta ah ee Macmiilka (03-387)
- Xaaladaha U-qalma ee Gaarka u ah Da'da iyo Nooca Caddeynta (14-459)

2. Maareeyaha Kheyraadka Kiiska ee DDA ayaa qiimeynaya caddeynta

- Caddeynta bilaabashada naafonimada ka hor da'da 18
- Caddeynta xaaladda u-qalmeysa
- Caddeynta xaddidaada baaxadda leh

3. Ogeysiiska go'aanka ayaa loo diraa codsadaha iyo wakiilka

Muddo intee le'eg ayay go'aamintu dad ku qaadataa?

- DDA ayaa wuxuu haystaa 30 maalmood laga bilaabo helida qaybta ugu dambaysa ee dokumentiyada la codsaday ka hor inta uusan go'aan qaad.
- Haddii DDA uu hayo macluumaad aan ku filnayn oo lagu go'aaminayo in aad xaq u leedahay oo aysan helin dhammaan dokumentiyada la codsaday, DDA ayaa wuxuu diidi karaa xaq-u-yeelashadaada 90 maalmood ka-dib laga bilaabo taariikhda codsiga.

Dokumentiyada loo baahan yahay

- Baaritaannada lagu oggaaday xaaladda u-qalanta ee aan la filayn in ay sii wanaagsanaato ama ay baxdo.
- Caddeyn muujinaysa in xaaladu ay jirtay ka hor da'da 18 ama da' kale sida lagu qeexay shuruudaha baaritaanka.
- Caddeynta xaddidaadaha baaxadda leh
 - Dhibcaha IQ
 - Baahiyada gargaarka jireed
 - Dhibcaha imtixaanka shaqeynta la qabsiga



Dhicitanka iyo dib-u-eegisyada

Xaq-u-yeelashada ayaa waxay dhaceysaa:

- Maalinta dhalashada ee 4aad
- Maalinta dhalashada ee 10aad haddii xaq ugu yeesho si waafaqsan dib u dhaca koritaanka

Dib-u-eegisyada

- Da'da 19 haddii go'aamintii ugu dambaysay ay ahayd ka hor da'da 16aad
- Marka ay jirto caddeynta macluumaad been-abuur ah, khalad ah, ama aan dad ku filnayn
- Maalinta dhalashada ee 20aad haddii go'aaminta xaq-u-yeelashada ee hadda ay ku tiirsan tahay caddeynta dib-u-dhaca tacliimeed ee Akhriska Ballaaran iyo Xisaabta Ballaaran

Joojinta

- Haddii aadan ahayn qof deggan Gobolka Washington
- Haddii aad codsato



Codsashada Adeegyada

Mar alla markii aad xaq u yeelato DDA, ayaa waxaad codsan kartaa adeegyada adiga oo:

- Ka sameynaya Codsiga Macluumaadka iyo Adeegga mareegtada DDA:

dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request

- La xiriiridda xafiska DDA ee degaankaaga

La xiriir xafiska DDA ee degaankaaga ama booqo mareegtada DDA si aad adeegyada u codsato.



Community First Choice (CFC): Barnaamijka Xaq-u-Lahaanshaha

Xaq ayaad u leedahay haddii aad tahay:

- Qof U-qalma Medicaid; oo
- Shaqo Ahaan U-qalma sida lagu go'aamiyay qiimeynta DDA CARE

Adeegyada CFC

- **Daryeelka Shakhsiyeed** ayaal bixiya caawimaadda hawlo maalmeedka sida qubeyska, dhar xirashada, ama maareynta daawooyinkaaga. Haddii aad u-qalanto, waxaad dooraneysaa daryeel bixiye aqoon leh. DSHS ayaal waxaa ay bixisaa lacagaha ku baxa baaritaanada asalka iyo tababar daryeel-bixiyaha ee aasaasiga ah ee loogu talagalay dhammaan daryeel-bixiyayaasha aqoonta leh.
- **Tababar Lagu Barto Xirfadaha** ayaad heli kartaa si aad u noqoto qof aad iyo aad ugu madaxbannaan hawlahaaga daryeelka shakhsiyeed ee maalinlaha ah. Waxaad u adeegsan kartaa qaar ka mid ah saacadaha daryeelkaaga shakhsiyeed ama xadka sannadlaha ah ee sannad maaliyadeedka gobolkaaga in aad ku iibsato Tababarka Lagu Barto Xirfadaha si daryeel-bixiyaha uu kuu baro sida loo sameeyo qaar ka mid ah hawlaha daryeelka shakhsiyeed. Daryeel-bixiyahaaga lacagta qaata ayaal KELIYA kugu caawin kara barashada hawlahaan soo socda:
 - *Karinta iyo diyaarinta cuntooyinka*
 - *Dukaameysiga*
 - *Hawlaha maamulka hawl-guriyeedka*
 - *Dhar dhaqidda*
 - *Qubeyska (waxaa ka reeban hawlaha qaadista/ wareejin kasta)*
 - *Dhar xirasho*
 - *Marsashada waxyaabaha udgoon*
 - *Dhaqashada gacmaha iyo wejiga*
 - *Dhaqidda, shanleynta, qaabeynta timaha*
 - *Marsashada waxyaabaha la isku qurxiyo*
 - *Ku xirashada makiinad koronto ku shaqeysa*
 - *Cadeysashada ama daryeelka ilkaha gacan ku sameyska ah*
 - *Daryeelka caadada*

- **Daryeelka Gargaarka** ayaa la adeegsan karaa si fasax loo siiyo daryeel-bixiyahaaga caadiga ah, ama loo beddelo haddii daryeel-bixiyahaaga caadiga ah uu buko ama aan la heli karin. Adiga ayaa xaddidaya inta saacadood ee daryeelkaaga shakhsiyeed ee la oggolaaday ee aad doonayso in daryeel-bixiyagaaga gargaarka uu shaqeeyo.
- **Ergashada Kalkaalisada Caafimaadka** La-socoshada tababarka iyo kalkaalinta ee loogu talagalay daryeelayaasha si ay ugu qabtaan hawlaha qaar, gurigaaga.
- **Nidaamyada Wax-ka-qabashada Xaaladaha Shakhsiyeed ee Degdegga ah (PERS)** waa aalad elektaroonig ah oo aad xirato kuna xiriirta telefoonkaaga, taas oo kuu oggolaanaysa in aad caawimaad hesho marka ay jirto xaalad degdeg ah. Marka la hawlgeliyo, shaqaalaha jooga xarunta wax ka qabashada ayaa la socon doona tilmaamaha aad bixisay si aad u soo weyddiisato caawimaad. Intaas waxaa sii dheer, adeegyada lagu daro ayaa la heli karaa si PERS-kaaga loogu qalabeeyo qalabka ogaanshaha dhicidda, meeleeeyaha GPS, ama nidaamka maamulida daawada. Maamulaha kiiskaaga ayaa kugu caawin doona in uu xadido haddii aad u qalantid nidaamyadaan.

Haddii aad u qalantid adeegga, qaybta PERS-ga ee caadiga ah ayaa lagu soo darayaa xirmadaada dheefta CFC. Adeegyada lagu daro ayaa lagu soo dalaci doonaa xadka sannadlaha ah ee sannad maaliyadeedka ee gobolkaaga.


- **Tababarka Maareynta Daryeel-bixiyaha** Daryeel-bixiyahaaga lacagta qaata ayaa qayb muhiim ah ka qaata kooxdaada taageerada. Waxaad maareynaysaa nidaamka maalinlaha ah ee daryeel-bixiyahaaga. Waxaa la heli karaa tababar lagu sharxayo sida loo xusho, loo maareeyo, loona fasaxo daryeelayaasha.
- **Kalaguurka Bulshada (Community Transition)** ayaa kaa caawin kara in aad ka guurto xarun hay'adeed una guurto bulshada. Waxaad dooran kartaa in aad u guurto gurigaaga, guriga qof qaangaar ah ama xarun lagu xannaaneeyo waayeellada iyo naafada oo taageero leh.

- **Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa** oo ay ka mid yihiin qalab ama waxyaabo kale, ayaa kaa caawin kara in aad hawlahaaga qabsato iyada oo uusan qof kale ku caawin ama in aad u madax-bannaanaato hawlo maalmeedkaaga.

Si aad u hesho tiknoolajiyadda dadka caawisa, waxaad u baahan kartaa talo-soojeedinta xirfadle oo ku saabsan agabka ugu wanaagsan ee aad ku kordhin karto madax-bannaanidaada. Xirfadlaha wuxuu ku talin doonaa tiknoolajiyadda saxa ah wuxuunna kugu caawin karaa in aad barato sida loo adeegsado marka aad hesho.

Tiknoolajiyadda dadka caawisa ayaa la soo iibiyaa iyada oo la adeegsanayo xadka sannadlaha ah ee sannad maaliyadeedka gobolkaaga.

Doorashada Adeeg Bixiyeyaasha ee CFC



Waa maxay Ka-tanaasulid?

Ka-tanaasulidda Adeegyada Ku Saleysan Guriga iyo Bulshada (HCBS) ayaa bilaabatay sannadkii 1981 iyada oo ah habab lagu saxayo "eexashada hay'adeed" maalgelinta Medicaid.

"Eexasho" macnaheedu waa in taariikh ahaan, shakhsiyaadka ay heli karaa adeegyo taageera iyaga oo xarun ku jira, balse haddii ay doonayaan in ay ku noqdaan bulshadooda ma heli karaan adeegyo la mid ah.

Ka-tanaasulidda waxaa uu macnaheedu yahay in qaar ka mid ah xeerarka federaalka in "laga tanaasulo" si maalgelinta adeegyada looga helo bulshada gudaheeda.

- Qaybta 1915 (c) ee Xeerka Damaannada Bulshada ayaa wax laga beddelay si loo oggolaado in goboladdu ay weyddiistaan ka-tanaasulidda xeer-nidaamiyaha Medicaid ee jira.
- Fikraddu waa in goboladu ay bixin karaan adeegyada bulshada iyada oo la adeegsanayo lacagta Medicaid ee la adeegsan lahaa haddii qofku uu deganaan lahaa xarun hay'adeed.

Tani macnaheedu waa in aad xaq u leedahay adeegyada lagu bixiyo xarun hay'adeed balse aad dooran karto adeegyada ka jira bulshada gudaheeda. Si aad uga mid noqoto ka-tanaasulidda waa in aad ku dhex nooshahay bulshada dhexdeeda.



Xaq-u-yeelashada ka-tanaasulidda

- Qofku waa in uu hawlgal ahaan iyo maaliyad ahaanba uu xaq u leeyahay Medicaid, waana in ay ka go'an tahay in uu ka soo baxo shuruudaha naafonimada federaalka, taas oo ka mid ah dhex mushaaxidda Go'aaminta Naafonimada ee Damaannada Bulshada.
- Xaq-u-yeelashada maaliyadeed waxaa lagu go'aamiyaa Codsiga Daryeelka Muddada Dheer. Maareeyayaasha Kheyraadka Kiiska ee DDA ayaa kugu caawin kara la xiriiridda kooxda LTC ama waxaad si toos ah uga waci kartaa **1-855-873-0642** (waxaad u baahan doontaa aqoonsigaaga ACES ID ama lambarka Damaannada Bulshada).
- Xaq-u-yeelashada hawlgal ahaan ayaa lagu go'aamiyaa Qiimeynta DDA CARE.

5 Ka-tanaasul ee DDA

Adeegyada Shakhsiga iyo Qoyska (IFS)

Taageerada Hab-dhaqanka Guriga Gudahiisa ee Degdegga ah ee Carruurta (CIIBS)

Basic Plus (B+)

Core

Community Protection (CP)

Dadku waxay markiiba ku jiri karaan oo keliya hal ka-tanaasul.

Adeegyada Shakhsiga iyo Qoyska (IFS)

Ka-tanaasulid

Ka-tanaasulidda IFA ayaa loogu talagalay in:

- Lagu taageero shakhsiyaadka la nool qoysaskooda.
- La siiyo shakhsiyaadka kala doorashada adeegyada dhaca gudaha xaddiga qoondaynta sannadlaha ah ee: \$1200, \$1800, \$2400, ama \$3600.

Taageerada Hab-dhaqanka Guriga Gudahiisa ee Degdegga ah ee Carruurta (CIIBS)

Ka-tanaasulid

Ka-tanaasulidda CIIBS ayaa loogu talagalay in ay isu-keento teegaarada carruurta, qoysaskooda, iskuulka, iyo nidaamyada kale ee taageerada si:

- Loo taageero carruurta (8-20 sano jirka ah) iyo qoysaskooda kuwaas oo halis ugu jiro in la geeyo meel ka baxsan guriga iyada oo sabab u ah hab-dhaqanno ama dabeecado adag.
- Loo bixiyo adeegyo ku saleysan baahida, oo ku xaddidan \$5,753/bishiiba.

Basic Plus

Ka-tanaasulid

Ka-tanaasulidda Basic Plus ayaa loogu talagalay in lagu taageero shakhsiyaadka u baahan taageero ka badan tan Ka-tanaasulidda IFS ay siin karto:

- Shakhsiyaadka ku nool gurigooda, guriga qoyska, Guriga Qoyska Qaangaar, ama Xarun Ay Deggan Yihiin Dad Waaweyn.
- Bixinta maaliyado wadareed gaaraya ilaa iyo \$6,192, maalgelin maalmeed iyo mid shaqaaleyn, iyo \$6,000 oo maalgelinta xaaladaha degdegga ah sannadkiiba si loo daboolo baahiyada adeegga.

CORE

Ka-tanaasulid

Ka-tanaasulidda CORE ayaa loogu talagalay in lagu taageero shakhsiyaadka halista ugu jiro in la geeyo meel ka baxsan guriga kuwaas oo baahiyadoodana lagu dabooli karin Ka-tanaasulidda IFA ama Basic Plus si:

- Loo bixiyo taageerada baxnaaninta ee degaanka.
- Loo siiyo adeegyo ku saleysan baahida oo aan dhaafsanayn kharashka maalinlaha ee Xarunta Daryeelka Dhexe.

Ilaalinta Bulshada (Community Protection)

Ka-tanaasulid

Ka-tanaasulidda Community Protection ayaa loogu talagalay in lagu taageero shakhsiyaadka u baahan in laga taageero ilaalinta amaanka bulshadooda:

- Waxay bixisaa taageerada degaanka ee baxnaaninta ee loogu talagalay shakhsiyaadka ka soo baxa shuruudaha eena oggol ka-qaybgalka barnaamijka ilaalinta bulshada.
- Xadka adeegyada ayaa lagu saleeyaa baahida waxaanna laga yaabaa in aysan ka soo bixin ama aysan dhaafsanayn kharashka maalinlaha ee Xarunta Daryeelka Dhexe.

Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa (ka-tanaasulidda CFC, IFS iyo CIIBS)

Agabka, qalabka iyo nidaamyada badeecada, ee aanan la xiriirin caafimaadka jireed ee macmiilka, ee loo adeegsado kordhinta, joogteynta, ama sii wanaajinta awoodaha hawlgalka ee ka-qaybgalayaasha ka-tanaasulidda.

- Waxay u baahan tahay talo-soojeedinta qoraal ah oo uu bixiyo xirfadle kuna saabsan baahida loo qabo tiknoolajiyadda.
- Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: qalabka la-qabsashada, barnaamijyada luuqadda (Proloquo2go) ama daare-damiyeyaal.



Dabar-goynta Dhilqaha (Ka-tanaasulidda B+, CORE iyo CP)

Dabar-goynta cimex lectularius (dhilqaha) waa dabar-goynta xirfadeed ee dhilqaha.

DDA ayaa caymiya dabar-goynta xirfadeed ee dhilqaha ee degaanka aasaasiga ah ee ka-qaybgalayaasha ka-tanaasulka haddii dadka ka-tanaasulidda helay:

- a) Ay ku nool yihiin guri iyagga u gaar ah ama abaarman oo ayna mas'uul ka yihiin bixinta kiradooda ama amaahda guriga; ama
- b) Ay la nool yihiin daryeele aasaasi ah oo aan ahayn cid qaraabo la ah.

Adeegyada dabar-goynta ayaa keliya ku saabsan: qiimeynta ama baarista bixiye aqoon u leh, adeegsiga sun laysa cayayaanka oo kiimiko ah ama kulayl ku daaweyn iyo hal booqasho oo dabagal ah.

**1-da Bishii Sibtembar, 2017 ayaa Gobolka Washington wuxuu noqday gobolkii ugu horreeyay qaranka oo bixiya Kiimiko Ku Dabar-goynta Dhilqaha.*

Ka-qaybgalka Bulshada (Keliya Ka-tanaasulidda IFS, Basic Plus iyo CORE)

Adeeg lagu kordhinayo xiriirkaaga iyo ka-qaybgalka taageerada bulshada.

- Natiijooyinka la filayo in ay ka soo baxaan adeeggan waxaa ka mid ah xirfad kobcin iyo/ama kobcinta xiriirrada wanaagsan.
- Bixiyaha adeegga ka-qaybgalka bulshada ayaa bixiya taageero laguugu talagalay inta aad ka qaybqaadaneyso hawlaha bulshada. *(ma bixiyo kharashka hawsha.)*
- Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara: In uu qof ku taageero barashada waddo cusub oo uu baska maro, in uu aado hawsha xarunta bulshada, ama in uu helo abaarman ama in uu ka qaybgalo kooxaha bulshada.

U-dhammaanshaha Bulshada (Keliya Basic Plus iyo Core)

Adeegyada taageerada gaarka ah ee isku-xira dadka bulshada degaanka si ay xiriirro iyo saaxiibtanimo ula yeeshaan dadka kale wee ay isku danta yihiin.

Daaweynta Fardaha La Xiriirta (Equine Therapy) (Ka-tanaasulidda CIIBS oo keliya)

Waayo-aragnimada daaweynta la xiriirta fardaha si kor loogu qaado koboca jireed iyo kan dareen.

La-qabsashada Deegaanka (Dhammaan Ka-tanaasulidda)

Wax-ka-beddelka jireed ee guriga ee loo baahan yahay si loogu guuleysto gelidda guriga.

- Wax-ka-beddelka lagu sameeyo guryaha ayaa loogu talagalay in lagu kordhiyo madax-bannaanidaada, ama gacan ka geysashada xaqiiqinta caafimaadkaaga iyo bedqabkaaga.
- Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara: qubeys la gaari karo (diyaarsan), kaabad ama biro la qabsado, fool-dhaq ama waaskad hoos loo dhigay, meesha laga xiro ama laga furo khasabadda oo otomaatik ah.
- Ka-tanaasulidda CIIBS iyo IFS: ayaa bixin kara kharashka dayactirka uu sababo ka-qaybgalaha ka-tanaasulka.

Daaweynta Muusikada

(Ka-tanaasulidda CIIBS oo keliya)

Waxqabadyada muusikada si kor loogu qaado horumarka laga sameeyay yoolalka gaarka ah.

Towjiihinka Kuwa Ay Iskufilka Yihiin

(Ka-tanaasulidda IFS oo keliya)

Towjiihayaasha ay iskufilka yihiin ayaa adeegsada waay-aragnimadooda shakhsiyeed si ay taageero iyo hagir u siiyaan ka-qaybgalaha ka-tanaasulka iyo/ama qoyska iyada oo loo eegayo baahida jirta.

Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara:

Taageero lagu helayo adeegyada bulshada degaanka, barnaamijyo iyo kheyraadyo laguna bixinayo jawaabaha su'aalaha ka-qaybgalayaasha ama soo-jeedinta ilaha kale ee taageerada.

Towjiihayaasha ay iskufilka yihiin ma towjiihin karaan xubnaha qoyskooda.

Fududeynta Qorshaha uu Qofku

Xuddunta U yahay

(Ka-tanaasulidda IFS oo keliya)

Geeddi-socod qorsheyn oo eegaya awoodaha, baahiyada, iyo waxyaabaha uu doonayo qofka.

Wuxuu adeegsadaa geeddi-socodyo oggaansho ujeeddo leh si uu macluumaad u soo ururiyo oo uu u dhageysto qofka. Oggaanshuhu wuxuu gacan ka geystaa aqoonsashada waxa qofka muhiimka u ah iyo sida ay jeclaan lahaayeen in wax looga qabto waxa iyaga muhiimka u ah. Geeddi-socodkan qorsheynta ayaa keena qorshe hawleed loo diyaariyay in uu qofku ka caawiyo in uu gaaro yoolalkiisa shakhsiyeed.

Kani wuxuu ka duwan yahay Qorshaha Adeegga ee uu Qofka Xuddunta u Yahay ee DDA.

Taageerada Hab-dhaqanka Wanaagsan iyo La-talin (dhammaan Ka-tanaasulidda)

Taageerooyinka qiimeeya oo wax ka qabta baahiyada caafimaadka hab-dhaqanka. Kuwan waxaa ka mid ah waxqabadyo toos ah oo kor loogu qaadayo hab-dhaqannada sii wanaajiya tayada nolosha iyo u-dhammaanshaha bulshada.

Baxnaaninta Degaanka (Ka-tanaasulidda Core iyo CP)

Adeegyada bulshada oo ay ka mid yihiin caawimaada daryeelka shakhsiyeed, kormeerka iyo barashada, sii wanaajinta, ama hanashada xirfadaha bulshada loogu dhex noolaanayo.

- Dhabbetusayaasha Degaanka: Awoodda Shakhsiyeed iyo Kala-doorashada; Aqoonsiga Wanaagsan ee Shakhsiga iyo Dadka Kale (*Xaaladda*); Joogteynta Xiriirrada lala leeyahay Qoyska iyo Saaxiibada (*Xiriirrada*); Ka-qaybgalka Nolosha Bulsho iyo Tan Jireed ee Bulshada (*Isdhexgalka*); Maareynta Hawlo Maalmeedka iyo Yoolalka Shakhsiyeed (*Kartida*); iyo Caafimaadka iyo Bedqabka – Beddelidda Nolosha
- Bixi taageerada ilaa iyo 24-saac oo ay bixiso hay'adaha qandaraasleyaasha DDA ee taageera naafada.



Goobta Sida Ku-meelgaarka ah Loogu Xannaaneeyo Bukaanka, Naafada iyo Waayeelka

Waxaa laga heli karaa dhammaan Ka-tanaasulidda (marka laga reebo CP)

Goobta sida ku-meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka, naafada iyo waayeelka waa daryeel go'an, oo muddo gaaban la bixiyo si loogu gargaaro qofka kula nool ee ah bixiyeha daryeelkaaga aasaasiga ah; sida

- Xubnaha qoyskaaga (bixiyeyaasha daryeelka lacagta ah iyo midka lacag la'aanta ah); ama
- Xubnaha aan qoyska ka tirsanayn ee aan lacagta ku qaadan daryeelkaaga; ama
- Bixiyeyaasha guriga wehelka ee qandaraasleyaasha ah ee uu lacagtooda siiyo maamulka DDA si ay adiga kuu taageeraan; ama
- Bixiyeyaasha adeegga guriga korsashada carruurta ee shatiga haysta ee uu lacagtooda siiyo maamulka DDA si ay adiga kuu taageeraan.
- Goobta sida ku-meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka, naafada iyo waayeelka ma beddeli karto daryeelka maalintii inta uu waalidkaaga ama mas'uulkaaga uu ku maqan yahay shaqo ama saacadaha daryeelka shakhsiyeed ee aad adigu heli karto.
- Daryeelayaashaada aasaasiga ah ayaa waxaa laga yaabaa in aysan bixin adeegyada kale ee DDA ee adiga laguugu talagalay inta lagu guda jiro waqtigaaga goobta xannaaneynta.
- Daryeelka xannaaneynta ayaa lagu bixin karaa gurigaaga, guriga qof aad qaraabo tihiiin oo heer cayiman ah (WAC 388-825-345) ama goob bulsho.
- Daryeelka xannaaneynta ma bixin karo wax ujuurro ah oo la xiriira daryeelka xannaaneynta ee bukaanka, naafada iyo waayeelka; tusaale ahaan, ujuurrooyinka xubinnimada ee xarunta madadaallada, ama ujuurrooyinka caymiska.
- *Daryeelka xannaaneynta ee ay bixiso kalkaaliso uma baahna oggolaansho hore.*

Qiimeynta Halista (dhammaan Ka-tanaasulidda)

Qiimeynta rabshadaha, qof dabagalidda, rabshadaha la xiriira galmada, ama hab-dhaqanka ugaarsiga si loo go'aamiyo baahida loo qabo adeegyada nafsaani, caafimaad ama daaweyn.

Kalkaalin Xirfadeed

(Ka-tanaasulidda IFS, Basic Plus, Core iyo Community Protection)

Adeegyada kalkaalinta muddada dheer, ba'an ee wax looga qabanayo baahiyada aanan uusan daboolin Medicaid (Apple Care).

Baxnaaninta Gaarka ah

(Ka-tanaasulidda IFS, Basic Plus, Core iyo CIIBS)

Taageerooyin gaar ah oo lagu baranayo ama lagu joogteynayo xirfado nololeed kala duwan.

Dhar Gaar ah

(Ka-tanaasulidda IFS iyo CIIBS)

Dhar aan xaddidaad lahayn oo la waafajiyay baahiyada naafonimada.

Sahay iyo Qalab Gaar ah

(dhammaan Ka-tanaasulidda)

Qalabka iyo sahayda lagama maarmaanka ah ee aanan lagu heli karin Qorshaha Gobolka ee Medicaid ama caymis kasta oo gaar ah oo aad leedahay. Waxaa ka mid ah qalabka iyo sahayda loogu baahan yahay hirgelinta qorshaha taageerada hab-dhaqanka wanaagsan ama daaweynta.

Tusaalooyinka waxaa ka mid noqon kara:

- Kursiga qubeyska
- Masaxaadaha
- Qalabka kaaba maqalka (Qiimayaasha Medicaid ee lagu dabaqayo)

Adeegyada Xasillinta (dhammaan Ka-tanaasulidda)

Adeegyada lagu caawinayo laguna taageerayo qofka inta lagu guda jiro khalalaasaha caafimaadka hab-dhaqanka. Adeegyada waxaa ka mid ah baxnaaninta gaarka ah, la-talinta qoyska/shaqaalaha iyo adeegyada sariirta ee khalalaase weecinta.

La-talinta Shaqaalaha / Qoyska (Dhammaan Ka-tanaasulidda)

La-talinta la siiyo qoysaska, shaqaalaha tooska ah, ama bixiyeyaasha daryeelka shakhsiyeed si looga soo baxo baahiyada gaarka ah ee ka-qaybgalaha ka-tanaasulka sida lagu muujiyay qorshaha adeegga ee uu qofku xuddunta u yahay (shakhsiga)/qorshaha taageerada shakhsiga.

Tusaalooyinka qaar waxaa ka mid noqon kara:

- Taageerooyinka nidaamyada war-isgaarsiinta sii kordhaya;
- Hagidda cuntada iyo nafaqada;
- Macluumaadka iyo waxbarashada naafonimada;
- Istiraatiijiyadaha loogu talagalay in si taabogal ah iyo si daaweyn leh in loola falgalo ka-qaybgalaha;
- La-talin degaan
- Bixiyeyaasha waa xirfadlayaal shati-haysta, diiwaangashan oo aqoon leh, oo uu qandaraas la galey maamulka DDA iyo gudaha baaxadda adeegga ee xirfadooda.

Shaqaalayn La Taageero

(Ka-tanaasulidda B+, Core iyo CP)

Adeeggan waxaa loogu talagalay shakhsiyaadka nadeynaya helitaanka iyo joogteynta shaqo isku dhaf ah, oo nafci leh.

Adeegga wuxuu ku habboon yahay baahida gaarka ah, danaha, awoodda iyo horumarinta xirfadda shaqo.

Hawlaha waalidnimada ee La Taageero

(Ka-tanaasulidda IFS oo keliya)

Adeegyada waxaa ka mid ah wax barid, towjiihinta waalidka, iyo istiraatiijiyadaha kale ee taageerada leh.

La-qabsashada Daaweynta

(Ka-tanaasulidda IFS, Basic Plus iyo CIIBS)

Wax-ka-beddelka deegaanka guriga si loo yareeyo ama loo baabi'iyo cadaadis saarayaasha.

Wax-ka-beddelka Gaadiidka

(Ka-tanaasulidda IFS iyo CIIBS oo keliya)

Xaalad waafajinta gaadiid ku habboon baahiyada qofka oo taageera isdhexgalka bulshada.

Waxbarashada Fayoqabka

(Ka-tanaasulidda IFS, Basic Plus iyo Core oo keliya)

Waraaq waxbarasho gaar ah oo daabacan oo bille ah oo loogu talagalay in ay gacan kaa siiso maareynta arrimaha la xiriira caafimaadka iyo gaarista yoolalka fayoqabka.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

DSHS 22-1839 SM (Rev. 4/21)